Xiriirka: Kassie McKnight-Xi
Mcknight-xi.k@portseattle.org

Degdeg Lagu Siidaynayo
Maarso 3, 2025

# $2 Milyan oo Fursado Dhaqaale ah Ayaa Lagu Heli Karaa Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Koonfurta King County

*Muddada codsiga waxay furan tahay ilaa Abriil 10, 2025*

**SEATTLE –** Barnaamijka Fursadaha Dhaqaale ee Bulshooyinka (EOC) ee Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Koonfurta King County (SKCCIF) ee Dekedda Seattle waxa uu hadda aqbalayaa codsiyada ururada bulshada ku salaysan si loo kordhiyo fursadaha dhaqaale ee bulshooyinka taariikh ahaan xaqiran ee ku hareeraysan Garoonka Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA) iyo Koonfurta King County, Duwamish Valley, iyo Beacon Hill.

Wadar dhan $2 milyan ayaa lagu heli karaa doorkan. Ururadu waxay codsan karaan ilaa $115,000 hal sano oo maalgelin ah iyo $100,000 ilaa $275,000 oo maalgelinta sanadaha badan ah (ilaa 3 sano). Muddada codsigu waxay furan tahay ilaa Abriil 10, 2025. Ururada bulshada ku salaysan ee leh 501(c)3, 501(c)6 ama kafaalo-qaad maaliyadeed oo leh 501(c)3 ama 501(c)6 ayaa uqalma inay codsadaan.

**Waayaha Barnaamijka Fursadaha Dhaqaale ee Bulshooyinka**
Barnaamijka Fursadaha Dhaqaale ee Bulshooyinka (EOC), waagi hore ahaa Barnaamijka Soo Kabashada Dhaqaalaha, waxa uu bulshooyinka la xaqiro ee ku dhaqan Koonfurta King County ku xiraa shaqooyinka mushaarka nolosha iyo xirfadaha shaqo ee la xiriira Dekadda. Maalgelintu waxay taageertaa barnaamijyada iyo adeegyada udiyaargarowga shaqo ee bulshadu hogaamiso kuwaasoo abuura wacyigelinta iyo marin-u-helka jiilka soo socda ee xirfadlayaasha si ay u galaan xoogga shaqo ee duulista hawada, ganacsiyada dhismaha, shaqooyinka cagaaran, iyo badda.

"Fursadani waxay abuurtaa marin-u-helka maalgelinada Dekadda ee loogu talagalay bulshooyinka wajahaya dib-u-dhaca deegaan iyo dhaqaale, kuwaas oo qaar badan oo ka mid ah aan waligood taageero maaliyadeed naga helin hadda ka hor," **ayay tiri Madaxa Guddiga Dekadda Seattle Toshiko Hasegawa.** "$14 waa maalgelin toos ah oo aan horay loo bixin oo la siinayo bulshooyinka aadka ugu dhow arrimaha oona hoggaaminayo xalalka."

Sanadki 2020, Barnaamijka Soo Kabashada Dhaqaalaha ayaa la aasaasay si uu bulshooyinka gacan uga siiyo inay ka soo kabtaan saamaynti dhaqaale ee ba'nayd ee ka soo gaartay musiibadi COVID-19. Sanadka 2025, iyadoo loo marayo kalfadhiyada dhageysiga bulshada, jawaab-celinta shuraakada, iyo ka faa'iidaysiga Tusmada Sinnaanta, Barnaamijka Soo Kabashada Dhaqaalaha waxaa loo beddelay Barnaamijka EOC, iyada oo diiradda dib loo saarayo maalgelinada lagu horumarinayo fursadaha dhaqaale beddelki soo kabashada.

Xiriirka: Kassie McKnight-Xi
Mcknight-xi.k@portseattle.org

“Barnaamijkan $2-da milyan ah wuxuu u taagan yahay ka go'naanteena joogtada ah ee ballaarinta dariiqyada lagu helayo shaqooyin mushaar fiican leh, oo qoysaska taageera,” ayay tiri Guddoomiyaha Dekedda Hamdi Mohamed. “Annaga oo ballaarinayna barnaamijkeena si aan ugu darno xaafado dheeraad ah oo taariikhiyan ah kuwa la xaqiro ee ku yaalla Koonfurta King County, Duwamish Valley, iyo Beacon Hill, waxaan xaqiijinaynaa in bulsho kasta ay marin u hesho tababarka iyo udiyaargarowga xirfada shaqo ee dhinacyada soo koraya sida duulista hawada, badda, dhismaha, iyo dhaqaalaha cagaaran. Waxaan ka gudbaynaa soo kabashada muddada-gaaban ah waxaana u gudbaynaa fursad waqti dheer ah — anagoo abuurayna gobol aad u adkaysi badan oo ku dhisan xoog shaqo oo loo dhan yahay.”

Isbeddelada kale ee la socda doorarka maalgelinta 2025-2029 waxaa ka mid ah:

- Ballaarinta juqraafiga gobolka si loogu daro meelaha ka midka ah Koonfurta King County, Duwamish Valley, iyo Beacon Hill ee ay Tusmada Sinnaanta ee Dekadda Seattle u aqoonsan tahay in ay ka duwan yihiin kuwa kale.
- Sii wadista mudnaansiinta ka go'naanta Dekadda ee lixda magaalo ee u dhow garoonka diyaaradaha iyo aqoonsashada sida codsiyada mashaariicda loogu talagalay magaalooyinka ay u heli doonaan heerka mudnaanta.

**Ku xiriirinta shaqooyinka la xiriira dekadda**
Iyadoo ku xiran dhammaan qeybaha dhaqaalaha muhiimka ah ee Washington iyo ku xirnaanta in ka badan 500 oo shaqo bixiyayaal ah oo ka hawlgala tas-hiilaadkeeda, Dekaddu waxay si gaar ah ugu taagan tahay inay abuurto dariiqyo lagu helo shaqooyin mushaar fiican bixiya oo u faa'iideeya bulshooyinka ay inta badan saameeyaan hawlgallada Dekadda. Maalgelinada horumarinta xoogga shaqada waa kuwo muhiim ah maadaama shaqooyin badan oo dekadda la xiriira ay shaqaale gabaabsi wajahayaan. Barnaamijyada udiyaargarowga shaqada ee ay bulshadu hoggaaminayso waxay ka caawin doonaan kaqeybgalayaasha inay helaan ka ag-dhawaanshaha, xirfadaha, khibradda, iyo tababarka loo baahan yahay in lagu hanto shaqooyinka sii adkaanaya iyo shaqooyinka bixiya mushaar ku filan qoyska ee aagagan shaqo.

"ConstructDiversity waxay samaynaysaa horumarro la taaban karo oo ay ku beddelayso qaabka shaqada dhismaha. Barnaamijkeenu kaliya ma furayo albaabo; waxa uu u dhisayaa buundooyin lagu gaaro shaqooyin waara oo loogu talagalay dhallinyarada la xaqiro ee ku dhaqan Koonfurta King County,” **ayuu yiri Guddoomiye Ku Xigeenka ConstructDiversity iyo xubin guddi Rodell Razor**. “Iyadoo la bixinayo marin-u-hel loo siman yahay, tababarid, iyo khibrad baraatiko ah, waxaan aragnaa natiijooyin la taaban karo oo ku saabsan kala duwanaansho kadhex jira dhismaha iyo goobaha la xiriira. Saameyntu waxay dhaafsiisan tahay sheekooyinka guusha shaqsiyeed – waxaan kobcinaynaa dhaqan shaqo oo aad loogu dhan yahay oo u faa'iidaynaya shirkadaha, bulshooyinka, iyo dhaqaalaha kale ee ballaaran. Inta aanu sii korayno, kaliya ma badalayno nolosha; waxaan dib-u-qaabaynaynaa mustaqbalka dhismaha.”

Port of Seattle

Xiriirka: Kassie McKnight-Xi
Mcknight-xi.k@portseattle.org

**Hannaanka Codsiga 2025**
Ma haysaa mashruuc leh natiijooyin la xiriira horumarinta xoogga shaqada iyo udiyaargarowga shaqada ee shaqooyinka la xiriira dekadda? Ururkaagu sidoo kale ma leeyahay khibrad iyo kalsooni la shaqaynta xubnaha bulshooyinka taariikh ahaan la xaqiro?

Booqo webseedka EOC si aad:

- U samayso Is-Qiimaynta SKCCIF EOC si loo go'aamiyo in ururkaaga iyo soo jeedintaada mashruuc ay yihiin kuwa ku habboon maalgelintan
- Waxbadan uga barato hannaanka codsiga, agabka soo jeedinta, iyo mashaariicdi horay loo bixiyay
- **U Codsato Maalgelinta Fursadaha Dhaqaale ee Bulshooyinka**

- U rukamato warbixinada iimaylka ah

**Ku Saabsan Sanduuqa Saamaynta Bulshada ee Koonfurta King County (SKCCIF)**
Dekadu waxay aasaastay SKCCIF sanadki 2019 si ay u horumariso iskaashiyada ku salaysan sinnaanta ayna kheyraad iyo taageero u siiso bulshooyinka taariikh ahaan la xaqiro, isir ahaan, iyo dhaqan ahaan kala duwan ee u dhow garoonka diyaaradaha. Laga soo bilaabo 2020 ilaa 2024, SKCCIF wuxuu daahfuray afarta door ee barnaamijyada Soo Kabashada Dhaqaalaha (hadda ah Fursadaha Dhaqaale ee Bulshooyinka) iyo Deeqaha Deegaanka (hadda ah Horumarinta Deegaanka) si loo maalgeliyo mashaariic ay hoggaaminayso bulshada kuwaasoo abuuraya dariiqyo lagu helayo tababar iyo shaqooyin mushaar fiican bixinaya, iyo maalgelinta horumarinada deegaanka. Tan iyo bilaabisti sanduuqa, in ka badan 50 ururo ayaa helay wadar dhan $9.25 milyan, oo lagu maalgelinayo in ka badan 80 mashruuc.

Sanadki 2024, Guddiga Dekedda Seattle wuxuu dib-u-fasaxay $14 milyan oo lagu sii wadayo mashaariicda ay hoggaaminayso bulshada ee SKCCIF ee kor u sii qaadaya sinnaanta, horumarinada deegaanka, iyo marin-u-helka shaqooyinka iyo xirfadaha ee shaqooyinka la xiriira dekadda. Sanduuqa SKCCIF waxa uu xoojiyay cilaaqaadka ay Dekaddu la leedahay xubnaha bulshada iyo ururada muhiimka ah ee u adeegaya bulshooyinkaas.

###

**Ku Saabsan Dekedda Seattle**
*Sanadki 1911 lagu aasaasay codka dadka sidi dawlad ujeedo gaar ah leh, hadafka Dekedda Seattle waa horumarinta fursadaha dhaqaale iyo tayada nolosha ee gobolka iyadoo la horumarinayo ganacsiga, socdaalka, baayac-mushtarka, iyo shaqo abuurka si loo siman yahay, la iskula xisaabtami karo, oo*

Xiriirka: Kassie McKnight-Xi
Mcknight-xi.k@portseattle.org

*deegaan ahaan xilkas ah.*

*Dekadu waxay leedahay oo ay maamushaa Garoonka Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma (SEA), Terminaalka Kalluumaysatada — guriga maraakiibta kalluumeysiga ee Waqooyiga Baasifigga — iyo marinnada dadweynaha. Dekadu waxay sidoo kale leedahay labo terminaal oo maraakiibta dalxiiska ah, terminaal badarka ah, hanti ma guurto ah, terminaalada xamuulka badda iyadoo la kaashanayso Dallada Dekadaha Badda ee Waqooyi Galbeed.*

*Hawlaha dekeddu waxay caawiyaan ku dhawaad200,000 oo shaqo iyo $7 bilyan oo mushaaraad ah gobolka oo dhan. 13-ka sano ee soo socdo, Ajendaha Qarniga Dekadda waxaa lagu doonayaa in la abuuro 100,000 shaqo oo dheeraad ah iyada oo loo marayo kobac dhaqaale iyadoo noqonaysa dekadda qaranka ku hoggaaminayso dhinaca cagaaran iyo tashiilka tamarta. Waxbadan ka ogow*webseedka Dekadda*.*

---